



Sidda looga codsado ka reebidda ka saarida wadanka Maxkamadda Laanta Socdaalka (Immigration)



Ka reebidda saariddu waa hakin ku meelgaar ah ee amarka saaridda. Waxa uu kuu ogolaadaa inaad sii joogto wadanka United States ka inta uu kuu socdo racfaanka amarka saarida ah ama aad sugayso inaad war ka hesho codsigaaga nasteexaysta ah. Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay kula wadaagaysaa cidda xaqqa u leh ka reebidda saarida. Waxay kaloo kuu sheegi sidda loo codsado ka reebida saaridda.

La hadal qareen!

Mar walba waa ay wacan tahay in lala tashado qareen laanta socdaalka sharciyadeeda yaqaan haddii aad ka walwalsan tahay in lagu masaafurin karo. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa qareemo ay dhici karto inay ku caawiyaan. Mari koodka QR ama gal shabakadda: lawhelpmn.org/providers-and-clinics.



Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booqo: lawhelpmn.org.



Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).



Guudmarka ka Reebidda Saarida

Waa maxay ka reebidda saariddu?

Ka reebida saaruiddu waxa ay gelisaa 'hakin' ku meelgaar ah amarka jira ee saaridda ah. Waxa ay kuu ogolaataa inaad si ku meelgaar ah si sharci ah ugu sii joogto wadanka United States ka inta aad ka qaadayso qaadayso talaabo kale kiiskaaga laanta socdaalka (immigration).

Xaq ma u leeyahay ka reebid saarid?

Waa khasab inaad dalbato in lagu ansaxiyo ka reebid in lagu saaro. Waxa aad dalban kartaa ka reebid saarid **haddii lagu siiyey amar ugu dambayn ah oo saarid ah** oo oronaya waa inaad ka baxdo wadanka United States. Amarka saarid ah waxa uu ka imaan karaa xaakim laanta socdaalka ah, Golaha Racfaanadda ee Laanta Socdaalka (BIA), ama makamad dowladda dhexe ah. **Ma jirto wax hubaal ah oo ah in haddii aad dalbato ka reebid saarid in lagu ansaxinayo mid.** Hay'adda ICE ayaa go'aanka gaarta.

Kolka aad dalbato ka reebida saaridda:

- **Waxa aad u baahan tahay inaad sharaxdo sababta ay tahay in lagu ogolaado inaad sii joogto wadanka.** Sababaha ugu qaalibsana ee loo dalbadaana waa:
 - Waa khatar inaad ku noqodo wadanka aad u dhalatay.
 - Waxa ay u keeni kartaa qaxar aad u weyn qoyskaaga haddii lagu masaafuriyo.
 - Haddii aad qabto cudur aad u daran aadana ka heli karin daryeel quman wadanka aad u dhalatay.
 - Aad leedahay codsi kale oo hawshiisu kaaga socoto laanta socdaalka.
 - Aad ka shaqeynayso xareysiga codsi dib loogu furayo kiiskaaga laanta socdaalka.
- **Waxa aad u baahan tahay inaad cadeeyso inaad ka qaadayso talaabooyin kale kiiskaaga laanta socdaalka.** Taa macnaheedu waxay noqon kartaa waxa aad racfaan ka qaadanaysaa amarka saaridda ah. Siddoo kale waxay macnahiisu noqon karaa waxa aad leedahay codsi kuu xareysan oo ah wuxuun nasteexayn ah oo ay laanta socdaalku bixiso. Kuwaa waxa ku jira Fiisaha U (U Visas) iyo Martabadaha Ilaalinada ku Meelgaarka ah.

Ma jiraan wax khataro ah oo ka imaan kara dalbashada?

Haa. Haddii aad dalbato ka reebidda saaridda, waxaa roon inaad codsigaaga boostadda dhigto intii aad gacanta uga geyn lahayd hay'adda ICE. Waayo, cid walba oo amar ugu dambayn ah oo saarid ah haysata waxa ay khatar ugu jirtaa in la qabto ama la masaafuriyo markii la rabo. Cid

walba oo amar kama dambays ah haysata waxa ay khatar ka weyn kuwa dadka kale ugu jirtaa inay qabato hay'adda ICE haddii uu sameeyo xafiiska deegaanku ee hay'addu Fulin iyo hawlgaaladda Saaritaanka (ERO).

Maxaa dhici haddii la ii ogolaado ka reebid saaridda ah?

Waxa aad is sharci ah ku joogi kartaa wadanka United States inta ka reebidda saariddu ay shaqeynayso. Hay'adda ICE kuma ay masaafurin karto xilligaa isaga ah. Waxaa lagu siin Amar Kormeerid ah. Taa macnaheedu waa waxaa jira xeerar ay khasab tahay inaad raacdo. Tusaale: Waxaa dhici karta inaad u baahato inaad si joogto ah isaga xaadiriso hay'adda ICE.

Maxaa dhici haddii codsigayga ka reebidda saaridda la diido?

Haddii lagu diido kolkaa amarkii saaridda ahaa waa uu jiri. Hay'adda ICE waa ay ku qaban kartaa ama ku masaafurin kartaa markii ay rabto. Waa inaad la kulanto qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan si aad ugala hadasho sharcigan waxyaabaha aad kala dooran karto. Waxaa dhici karta inaad awoodo inaad ka xareysato ka reebid Maxkamad ama Golaha Racfaanadda ee Laanta Socdaalka. Waxaa kaloo dhici karta inaad u baahato inaad u diyaariso qoyskaaga arintan lacala haddii lagu masaafuriyo. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan ah taa oo dadka la wadaagta waxyaabaha aad doonayso inaad diyaarsato. Mari kooda QR (QR code) ama gal mareegta:



<https://www.lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/making-sure-your-family-ready-if-you-get-deported>.

Ka reebidda Saaridda ma ku jiraa qoyskayga oo dhani?

Maya. Qof walba oo qoyska ka mid ah oo xaq u lehi waa khasab inuu xareysto codsi uu isagu leeyahay oo u gaar ah oo ka reebidda saaridda ah.



Tusaale ahaan: Ramón iyo Inés waa is qabaan.

Labadaba waxaa amray in laga saaro wadanka United States xaakim laanta socdaalka ah. Labaduba sidoo kale waxa ay leeyihiin codsiyaal u xaraysan oo kuwa Martabadda Ilaalinta ku Meelgaarka ah. Ramón iyo Inés waa khasab in mid walbaa uu xareysto codsi ka reebidda saaridda ah oo u gooni ah. Mid walbaa waa inuu bixiyaa khidmad codsi oo u gooni ah.

Ka reebidda saariddu ma mid rasmi ah baa?

Maya. Ka reebidda saariddu waa ku meelgaar. Waxa ay ku siin fursad aad ku joogi karto United States inta aad ka dhamaynayso hawsha racfaanka ama inta aad sugayso natiijooyinka codsiga nasteexaynta ah.

Ka reebidda saaridda ma lala noqon karaa?

Haa. Hay'adda ICE waa ay la noqon kartaa ka reebidda saaridda haddii aad ku xadgudubto heshiiska kormeerkaaga ama haddii lagu xiro. Siddoo kale waa lala noqon karaa haddii aad been ka sheegtay codsigaagga.



Sidda lagu Codsado Ka Reebidda Saarida

Siddee ku codsadaa ka reebidda saarida?

Waxaa jira 5 talaabo oo lagu dalban karo ka reebidda saaridda.



TALAABADDA 01

Buuxi foomka I-246 (Form I-246).



TALAABADDA 02

Soo aruuri diyaarina dukumiintiyadda iyo khidmada xareynta si aad ula dirto codsigaagga.



TALAABADDA 03

Ka sameyso nuqul (copy) codsigaaga.



TALAABADDA 04

Boostadda u dhig codsigaaga Xafiiska Deegaanka ee kuugu dhow ee hay'addu Fulin iyo hawl-galo Saaritaan (ERO).



TALAABADDA 05


Hay'adda ICE waxa ay kula soo socodsiin waxa go'aankoodu noqdo.



Waxaa dhici karta inaad u baahato inaad ugu tagto hay'adda ICE si aad isaga xaadiriso inta aad sugayso go'aanka codsigaaga.

Hay'adda ICE waxa ay kuu soo diro warqad kuu sheegaysa in aad u baahan tahay is-xaadirin iyo in kale. Haddii aad hesho warqad, waa khasab inaad ugu tago tgato is-xaadirin hay'adda. U soo qaado cadeyn iska xaadirinta ICE ah inaad leedahay codsi kuu xareysan oo ah ka reebidda saaridda. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo sharaxda waxa ka dhici iska xaadirinta hay'adda ICE. Mari koodka QR (QR code) ama gal mareegta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/what-expect-when-you-go-ice-check-minnesota.

TALAABADDA 01: Buuxi Foomka I-246 (Form I-246).



Mari koodka QR (QR code) ama gal barta ice.gov/forms si aad u hesho nuqul banaano oo foom ah. Waxaa jira tilmaamo ah "Sidda loo Buuxiyo I-246" ee qaybta warqaddan xogta aruursan ah. **Waa khasab inaad ku buuxiso foomka Afka-Ingiriiska.**



TALAABADDA 02

Soo aruuri diyaarinta dukumiintiyadda iyo khidmada xareynta si aad ula dirto codsigaaga. Waa khasab inaad la dirto 5 waxyaabood codsigaaga ka reebidda saaridda:



- ☐ **Foomka I-246 oo buuxsan saxiixana.**
- ☐ **Nuqul dal-ku-galkaaga (passport) ah.** Waa inaad sawir ka qaadataa bog walba oo dal-ku-galkaaga ah. Dal-ku-galkaagu waa inuusan dhacayn ugu yaraan 6 bilood laga bilaabo kolka aad dirto codsiga. Haddii aadan haysan dal-ku-gal (**passport**), dir cadeyn ah

inaad mid dalbatay ama dukumiinto socdaal oo la mid ah. Haddii aadan dalban karin dal-ku-gal (passport) iyadoo sababtu tahay in dhamaan qunsiliyadahii wadankaaga ee wadanka Unites States la wada xiray, soo qaado dukumiinti cadeynaya in qunsiliyadahii la wada xairay. Hay'adda ICE waxaa dhici karta inaysan aqbalin codsigaaga ka reebidda saaridda ee wadanka dal-ku-gal (passport) la'aan.

- **Nuqul (copy) ah 1 dukumiinti oo cadeynaya cidda aad tahay.** Dukumiintiga waa khasab inay bixisay dowladda United States ama dowlad wadan kale. Haddii dukumiintigu uusan ahayn afka Ingiriis, waa khasab in la turjumo. Tusaalayaasha dukumiintiyadda la aqbali karo waxaa ku jira:
 - Warqadda dhalashada
 - Fiise (Visa) ay bixisay qunsiliyad ajnabi ah
 - Dukumiinti aqoonsi (ID) heer qaran ah oo sawir leh
- **Khidmadda xareynta ee \$155 ah.** Soo dir jeega khasnadjiga (cashiers check). Ku qor jeega “Immigration and Customs Enforcement.”
- **Wixii daliilo ah ee aad hayso ee ku saabsan sababta aad u codsanayso inaad sii joogto wadanka United States.** Daliilahu waa dukumiintiyo iyo sawiro caawiya inaad cadeyso sheekadaadda. Kuwani waxa laga yaabaa inay noqdaan daliilo cadeeya:
 - Inay khatar tahay adigu inaad ku noqoto wadanka aad u dhalatay.
 - Waxa ay u keeni qaxar aad u weyn qoyskaaga haddii lagu masaafuriyo.
 - Inaad qabto cudur aad u daran aadana ka heli karin daryeel quman wadanka aad u dhalatay.
 - Aad leedahay akhlaaq iyo asluub wacan.
 - Aadan lahayn wax dambi ah oo aad horey u gashay. **AMA** aad raadsatay daryeel ka dib kolkii dambi lagugu soo eedeeyey.
 - Aad leedahay codsi hawshiisu hadda kaaga socoto laanta socdaalka.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan ku jirto taa oo bixisa tusaalooyin ku saabsan daliilaha fiican. Waxa ay taxdaa noocyadda dukumiintiyadda ah ee aad u baahan tahay inaad soo aruuriso. Mari koodka QR (QR code) ama gal mareegta: [lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/preparing-evidence-and-testimony-immigration-court](https://www.lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/preparing-evidence-and-testimony-immigration-court).

Dhamaan dukumiintiyadda oo dhan waa in la soo gudbiyaa iyagoo Afka-Ingiriiska ah. Haddii dukumiintiyadda asliga ahi aysan ahayn Ingiriis, waa khasab in ciddi turjunto. Qofi waa inuu

turjumaa. Uma baahnid inaad isticmaasho turjumaan xirfadle ah, Qof labada afba yaqaan oo qoyska ka mid, saaxiib, ama qof aad istaqaanaan ayaa sameyn karo. Waa khasab inuu buuxiyo turjumaanku foomka tujubaanka. Ka hel foomka turjubaanka oo banaan mareegta: [lawhelpmn.org/sites/default/files/2025-02/Immigration Certificate of Translation.pdf](http://lawhelpmn.org/sites/default/files/2025-02/Immigration%20Certificate%20of%20Translation.pdf).

TALAABADDA 03



Ka samee nuqul (copy) Foomkaaga buuxsan ee I-246 (Form I-246), dalk-ku-galka (passport), dukumiintiga aqoonsiga iyo wixii daliilo ah ee aad la soo dirto codsigaaga. Ula har **nuqul (copy)** ah Foomka I-246 (Form I-246) naftaadda. Ula har dal-ku-galkaaga **asalka ah**, dukumiintiga aqoonsiga iyo daliilaha naftaadda.

TALAABADDA 04

Boostada ugu dir codsigaaga Xafiiska kuugu dhow ee Deegaankaaga ee hay'adda Fulin iyo hawlgaladda Saaritaanka.



Boostadda ugu dir codsigaaga ka reebidda Xafiiska Deegaankaaga ee kuugu dhow (ERO). **Waxa ay kuu soo diri doonaan rasiid. Dhigo rasiidka meel amaan ah.**

Haddii aad ku nooshahay Minnesota, Iowa, Nebraska, North Dakota, ama South Dakota, xafiiska kuugu dhawi waa St. Paul, Minnesota. Ku hagaaji codsigaaga:

St. Paul ERO Field Office
1 Federal Drive
Suite 1601
Fort Snelling, MN 55111

U sheeg qof aad ka dirayso codsiga inaad u baahan tahay inaad la socoto codsigaaga kolka aad dirayso. Gado la socod si kolkaa aad u ogaato kolka codsigaaga la geeyo meesha aad u dirtay. Hubi inaad hesho cadeyn ama rasiid kolka la geeyo.

TALAABADDA 05

Hay'adda ICE waa inay ku soo ogaysiiso haddii codsigaaga ka reebidda saarida la ansaxiyo ama la diido. Waxa ay qaadan kartaa muddo dheer in hay'adda ICE ay go'aan gaarto. **Sii wad inaad tagto iska-xaadirinta hay'adda ICE ee lagu qabtay inta aad go'aanka sugayso.**



Haddii codsigaaga la ansaxiyo:

- Waxaa lagu soo saari doonaa Amar Kormeerid. Waxa uu ku siin amarkaagsi xeerarka ay tahay inaad la socoto. Tusaale: Waxaa dhici karta inay khasab noqoto inaad si joogta ah isaga xadiriso hay'adda ICE.

Haddii codsigaaga la diido:

- Amarkii saaridda ahaa waa uu jiri.
- Hay'adda ICE waa ay ku qaban kartaa kuna masaafurin kartaa.
- Kuuma ay soo noqonayso khidmadaaddii \$155 ahayd.
- Waa inaad la kulanto qareen si aad ula falanqayso sharciyan waxyaabaha aad kala dooran karto. Waxaa dhici karta inaad awoodo inaad ka xareysato codsi ka noqosho diidmada ah Maxkamad ama Golaha Racfaanadda ee Laanta Socdaalka.




Sida Loo Buuxiyo Foomka I-246 (Form I-246)



Waa khasab inaad runta ku sheegto codsigaaga.

Waa khasab inaad uga jawaabto su'aalaha foomka codsiga ka reebidda saarida si buuxda oo daacad ah. Haddii aad been ku sheegto codsiga, waxa ay keeni diidmo degdeg ah.

Talooyin Guud Oo Ku Saabsan Buuxinta Foomka



01

Waa khasab inaad foomka ku buuxiso Af-Ingriis.

02

Ku teeb garee jawaabahaaga ama ku qor khad madow.

03

Haddii wax foomka ku qorani aysan adiga ku quseyn, ku qor "N/A" (Not Applicable) meesha.

04

Haddii aad u baahato meel kale oo banaan si aad uga jawaabto su'aal, ku qor warqad cad oo banaan. Ku qor magacaaga, Lambarka-A (A-Number), lambarka telefankaaga iyo ciwaanka wixii warqado oo dheeraadka ah.

05

Warqadan xogta aruursan ahi waxa aay bixisaa talooyin ku saabsan buuxinta **qaar** ka mid ah su'aalaha. Hubi inaad akhrido aadna ka jawaabto **dhamaan** su'aalaha. Tilmaamo kale oo badan ayaa ku qoran foomka laftiisa.

Action Block – For ICE Use Only

Ka tag qaybtan foomka banaan.

Akhbaarta Adiga Kugu saabsan

Jaantuskani waxaa uu hayaa talooyin ah buuxinta **qaar** su'aalaha qaybtan ee foomka ah.

Su'aal	Tilmaamaha
A-File Number Lambarka-A ee Galka	Kan waxaa kaloo loogu yeeraa Lambarka Diiwaangelinta Ajnabiga (A-Number). Gal barta immigrationhelp.org si aad u ogaato lambarkaaga-A (A-Number).
Last Name Magaca Awoowe	Haddii aad leedahay 2 magac oo awoowe, ku qor labada magacba santuukha Magaca Awoowe.
Length of Stay Requested Dherarka Mudadda la Codsaday	Ma jirto jawaab khalad ah oo su'aashani leedahay. Waydii dherarka mudadda aad is leedahaya waad u baahan tahay. La tasho qareen laanta socdaalka (immigration) qaabilsan haddii aad awoodo.

Sababta(baha) Codsiga ka Reebidda Masaafurinta ama Saaridda

Ku sharax halkan sababta aad ugu baahan yahay inaad sii joogto wadanka United States.

Jaantuska hoose waxa uu hayaa sababaha aad inta badan ugu baahan karto inaad sii joogto.

Sababta Suurtagalka ah	Waxyaabaha Lagu Qoro Foomka
It is not safe for you to return home. Amaan kuuma aha inaad ku noqoto dhulkaaga	- Sharax sababta aysan amaan u ahayn inaad ku noqoto dhulkaaga. - Sheeg haddii aad leedahay codsi hawshii socoto oo nasteexayn ah. Tusaale: "waxa aad u dirsaday codsi Fiisaha U (U visa) hay'adda USCIS."
You have a severe medical condition. Or you are the only caretaker for a family member with a severe medical condition. Haddii aad qabto cudur aad yu daran. Ama aad tahay qofka kaliya ee haya qof ehel ah oo cudur daran qaba.	Sharax sababta aad ugu baahan tahay inaad u joogto wadanka United States daweyn. Sheeg sababta daweyntu aysan uga jirin wadankaaga aad u dhalatay.
If you have family here. Haddii uu ehel kuu joogo halkan.	Sheeg haddii aad leedahay xile ama ilmo jooga wadanka United States. U sharax in masaafurintu ay kala qaybinayso qoyskaaga.

Waxaa jira waxyaabo kale oo muhiim ah oo aad ku oranayso jawaabtaadda su'aashan.

Mowduuca	Waxyaabaha Lagu Qoro Foomka
Criminal history Taariikhda dambiyada	• Haddii aadan wax dambi ah horey u galin, sheeg taa. • Haddii aad horey dambi u gashay, sheeg waxa aad sameysay si aad dhaqanceliso naftaada. Kuwaa waxaa ku jiri kara aadidda barnaamij daryeeladda qabatinka maan-dooriyeyaasha ama khamriga ama la talin.
Long-term residency Muddo dheer deganaanta	Sheeg mudadda aad ku noolayd wadanka United States.

Daliilaha La Diray (ku lifaaqan)

Qor magaca wixii noocyo daliilo ah ee aad la dirayso codsigaaga. **Hubi inaad saxiixdo foomka qaybtan haddii aad dirto daliilo iyo haddii kaleba.**

Akhbaarta Haddii Foomka uu Diyaariyo Cid aan Ka Ahayn Codsadahu

“Diyaariyahu” waa cid kaa caawisay buuxinta foomka. Qofkaasi wuxuu noqon karaa qof ehel ah, saaxiib, ama qareen. Ciddi ma kaa caawisay buuxinta foomka?

- **Haddii aad haa tiri**, qor magaca iyo akhbaarta la soo xiriirida ee qofkaa. Waa khasab siddoo kale inuu saxiixo foomka.
- **Hadii aad maya tiri**, ka bood su'aalaha.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.